



**PONTUS MARINE HOLDINGS Plc**

**War saxaafadeed**

**Taariikh : 29/11/16**

**Waxaa Illaahay mahadii noo suurto gashay manta inaanu daah furno mashruucan wax soo saarka qaybtiisii labaad.**

**Qaybta labaad ee mashruucu waxa uu u kala baxaa laba qaybood.**

- a- Suuqgyanta kalluunka ee wadanka gudahiisa.**
- b- Suuqgaynta kalluunka ee wadanka dibadiisa.**

**Halkan waxaanu ku soo bandhigaynaa qabta hore ee wajiga labaad oo ah in kalluunka ay shirkadu soo saartaa uu noqdo mid lagaga haqab beelo ama wada gaadha suuqyo badan oo wadanka gudahiisa ah.**

**Qaybta suuq gaynta wadanka dibadiisu way socotaa laakiin daahfurkeeda waxaanu soo bandhigi doonaa dhowaan insha Allah.**

**Mashuuraca qaybtiisa labaad waxay ka kooban tahay:**

- 1- In insha Allah muddo sanad gudahiis lagu balaadhiyo goobaha iibka ee shirkada wadanka oo dhan**
- 2- Goobahaas waxa laga heli doona kalluun daray ama fresh ah iyo isagoo bisilba.**
- 3- Goobaha laga hirgalinayo waxa go'aankeeda leh shirkada Pontus Marine iyadoo eegaysa in ay goobahaasi noqdaan qaar dhex u ah bulshada isla markaana ku habboon in lagu iibiyo kalluunka.**
- 4- Goob kasta waxa yeelanaya qof ka mid ah dadwaynaha haddii uu buuxiyo shuruudaha u yaala shirkada Pontus Marine.**
- 5- Qof kasta oo raba inuu ka qayb qaato waxa uu soo buuxinaya codsi uu ku sheegayo goobta uu ka rabo iyo sida uu u rago inuu u hirgaliyo shaqadan.**
- 6- Codsi kasta oo la soo buuxiyo waxa loo eegayaa sida ay u soo kala horeeyeen iyo inay noqdaan qaar ka bixi kara hawshan oo ah mid macaash samayn karta haddii loo hagar baxo.**
- 7- Kala saarista dalabaadku waa qaar cadaalad ah oo qof walba la tix galin doono codsigiisa isla markaana loo sheegi doono sababtii lagu qaatay ama lagu diiday codsigiisa.**

**Mashuruucan waxa naga la qayb qaadanay hirgalintiisa Dahab Micro-finace oo haddii qofka raga inuu mashruucan ka qayh qaataa uu rabo in loo maal-galiyo mashruuca ay tahay inuu codsi u qoro Micro-Dahab taasoo haddii uu buuxiyo shuruudihii laga rabay loo maal-galin doono mashruuca.**

**Mashuuracani waxa uu ka qayb qaadanayaa kobcinta dhaqaalaha ee wadanka waxaanu shaqo u abuurayaa dhalin iyo waayeel badan oo wadanka ku shaqo la'.**

Waxan halkan mahad gaara ah u jeedinayaa qof kasta oo ka qayb qaatay hirgalinta mashuuracan gaar ahaan wasaarada kalluumaysiga iyo wasiirkooda Mr. Ali Buureed oo heegan u ah kobcinta kalluunka iyo kalluumaysatada si gaar ahn a noola shaqeeyay.

Waxaan Illahay ka baryaynaa inuu abaaraha inaga dulqaado ina garansiiyona khayraadka wadankeena ku jira inoona dhib yareeyo, barakeeyana quudashadooda qaydhiin iyo bisaylba

Fiiro gaar ah.

Codsiga furashada meherad waxaad ka heli kartaa xafiisayada ay shirkadu ku leedahay Hargaisa iyo Berbera, ama waxaad ka soo dajisan kartaa mareegta shirkada ee [WWW.Pontunmarine.com](http://WWW.Pontunmarine.com)

Taariikhdu markay tahay 1/12/2016.

Mudnaantaa

Ahmed A Mohmoud

Maareeyaha Guud ee Shirkada.

Pontus Marine Holdings